

Gacaliye Dan-wadaage,

Maadaama dugsiga loo-xidhay COVID-19 awgeed ay tahay wax maanta caadi ah waqtiga aan joogno, waxaan maqalnay in ururo bulshooyin badan ka kooban ay codsadeen **khayraadka waxbarashada masaafadda fog si ay ula ewadaageen qoysaska aad u adeegto.**

Hoos waxa ku yaal khayraad waxbarasho onlayn ah ee qoysaska oo bilaasha, oo tayo sare leh, qaar xataa waa allado caan ku ah macallimiinta! Waxaannu si buuxda u aqoonsannahay in badi qoysasku laga yaabo in aanay awoodin in ay maalinta oo dhan waqti ku qaataan ilmahooda kala shaqeeyaan fursadaha barashada ee guriga dhexdiisa. Iyada oo taas maanka lagu hayo, **goobahani waa madadaalo, u sahlan ilmaha inuu isticmaalo kelidii ama la isticmaalo waalidka:**

Khan Academy

[Khan Academy](#) waa ka ugu wanaagsan ee lagu yaqaan barashadiisa saaxiibtinimmo ee casharadda xisaabta, laakiin sidoo kale wuxu bixiyaa cutubyadda akhrinta, xisaabinta, dhaqaalaha, iyo inbadan! Oo ay la socdaan cutubyo ay heli karraan dhammaan da' kasta, casharadda Khan Academy waxay kuu oggolaanayaan kaydinta iyo raad-raaca horumarkaaga waxanna lagu heli karaa luqaddo badan. Eeg [halkan](#) si lagaga caawiyo abuuridda akoon. Khan Academy sidoo kale wuxu bixiyaa [jadwallo maallinle ah iyo onlayn si uu u taageero waalidka](#) ku taageeraya carruurtooda barashadda elektrooniga.

Raz-Kids

[Raz-Kids](#) wuxu taageera xannaanada illaa heerka 5 aad ee akhriska. Carruurto waa aay dhegaysan karaan, akhrin karaan, ama u duubi karaan nafahooda akhrinta buugta heerka ugu saxsan. Akoonnada waa u lacag la'aan dhammaan illaa dhammaadka sannad dugsiyeedka..

PBS Kids

[PBS Kids](#) wuxu u wanaagsanyahay qoysaska haysta carruurta da'doodu tahay 2-8. Waxay bixisaa waxqabado elektroonig ah, ciyaaro, iyo muuqaallo (sidoo kale waxqabado aan ahayn muuqaallo) maadooyin badan, oo aay ku jiraan xisaab, suugaanta, sayniska iyo dareemaha.

BrainPOP

[BrainPOP](#) waxay bixisaa muuqaallo, su'aalo kedis ah, iyo mashaariicda wax kasta oo u dhexeeya laga bilaabo saynis illaa xisaab illaa farshaxan iyo muusig loogu tallo gelay ardayda dugsiga hoose iyo da'da dugsiga dhexe. BrainPOP sidoo kale wuxu bixiyaa illo loogu tallo gelay ardayda luqadda English-ka iyo carruurnimmada hore.

Siday markasta ay tahay, [fadlan noo oggolaw inaan oggaano cutubyadda dheeraadka ah aad u malaynayso inay noqon karaan kuwa ugu faa'iidada badan qoysaska aad u adeegto.](#) **Waxan kusoo darnay su'aalo cusub xog ururinta,** weydiinta habkaaga xidhiidhka ugu wanaagsan qoysaska iyo wax khayraad wanaagsan aad aragtay, fadlan u fiirso. Tan ayaynu ku wada jirnaa.



Caafimaad qab,

A handwritten signature in black ink, appearing to read 'Osman Ahmed'. The signature is stylized and cursive.

Osman Ahmed
Agaasimaha iskaashatada dadweynaha.